

# **Imaanshaha dugsigu waa muhiim**

## **Macluumaadka waalidiinta iyo masuulada**

Ogsoonow xaqiyooyinkan hadii aad ka masuul tahay caruur dhigata dugsiyada da'da qasabka ah, isla markaana aad ku nooshahay xaafadan Newham. Kownsulka Newham waxa uu kaalmeeyaa sidii aad u hubin lahayd in caruurtu sida ugu haboon uga faa'iidaystaan waxbarashada. Waxbarashada fiican waxa ay horseed u tahay helitaanka fursadaha nolol fiican, shaqooyin wacan iyo weliba hanashada shaqooyin mushaharkoodu sareeyo. Sidoo kale, waxbarashada fiican waxa ay caruurga u sahashaa in ay bartaan dhixgalka bulshada, isku kalsoonaanta, iyo weliba in ay noqdaan kuwo afaca bulshada ay la nool yihiin.

Qodobadan hoose waxa ku xusan xeerarka khuseeya imaanshaha dugsiga.

- Caruurga da'doodu u-dhaxayso 5 – 17 sano waxa ku qasab ah in ay dhigtaan waxbarasho xili-buuxa (balse laga bilaabo bisha September 2014, waxa da'daasi laga dhigayaa 18-sano-jir).
- Nidaamka u-degsan Newham Council waa in caruurga dhamaantood ay bilaabaan dugsiyada bisha September ee sanadka ay gaaraan shan sano-jir.
- Hadii aad dalbato booska dugsiga ee ilmahaaga, isla markaana aadan aqbalin dugsiga, waxa lagu soo waydiin doonaa sida kale ee aad ilmahaaga ugu helayso waxbarasho xili-buuxa, taasi oo ay lamahuraan tahay in ay noqoto waxbarasho ku haboon da'da ilmaha, karaanka iyo weliba baahiyaha gaarka ah e ilmaha.
- Hadii aad ilmahaaga wax ku barayso guriga, waxa ay Newham Council hubin doontaa in waxbarashada aad ugu dhigayso gurigu tahay mid ku haboon.
- Hadii aad ilmahaaga gayso dugsi madaxbanaan ama dugsi-diimeed, fadlan ka soo wargali adeega ‘Attendance Service’ (xiriirka hoose ku xusan kala xiriir), hadii kale waxa ilmahaaga loo tixgalinayaa sidii ‘Ilmo Ka-maqaan Dugsiga’. Taasi oo sababi karta in la bilaabo baaritaan lagu hubinayo in ilmahaagu helo waxbarasho.
- Marka aad aqbasho in ilmahaagu yimaado dugsiga, waxa aad masuul ka tahay in aad hubiso in ilmahaagu yimaado dugsiga wakhtiga loogu talo-galay maalin kasta, isla markaana ka maqnaanin dugsiga hadii aanay jirin xaalado lamahuraan ah. Waxana lagu oogi karaa dacwad hadii aanay waalidiintu oofin masuuliyadaasi.
- Lama ogola fasax xiliyada dugsiga lagu jiro.
- Hadii aanu ilmahu dugsiga imaanin xili-dugsiyeedka ama daahidoodu aad u-badato waxa waalidku mutaysan karaan ganaax lacageed.
- Ganaaxa lacagtu waa £60 oo lagu xukumi karo waalid kasta oo ka masuula ilmaha, waase hadii lagu bixiyo 21-maalmood gudahood. Hadii lagu bixiyo inta u dhaxaysa 12-maalmood ilaa 28 maalmood ganaaxu waxa uu noqonayaa £120. Balse hadii ganaaxa la bixin waayo waalidka waxa lagu soo oogayaa dacwad maxkamadeed.

Waantu kusoo dhawaynaynaa hadii aad ku cusub tahay wadanka. Hadii aad rabto in aad barato luqada Ingiriisida, ama aad sii korodhsato, waxa aad wax ka waaydiisaa dugsiga ilmahaaga, oo aad ka heli karto macluumaadka fasalada lagu barto luqada.

Macluumaad dheeraad ah waxa aad kala xiriiri kartaa adeega 'Attendance Management Service'

Telefoonka: 020 3373 0390

Email-ka: [attendance.management@newham.gov.uk](mailto:attendance.management@newham.gov.uk)